## Soo koobid

Helitaanka warbixinadda, adeeca talo-bixinta xilhayaha iyo duruufaha shaqadda ee waayahan cudurkan safmarka ee Korona Fayraska - najiitadda baadhitaanka dadwaynaha ee qaybtiisa ku saabsan soo guuraaga MigCOVID

Marka lagu jiro xaaladahan khatarta ah, waxa aad u muhiim ah in la helo warbixino buuxa, sax ah oo la aamini karo, sida tusaale ahaan khatartan cudurkan safmarka ee Koroonaha (Covid-19) ee adduunka oo dhan ku faafay. Inkastoo ay tahay in la hubiyo, sidii lagu heli lahaa warbixino buuxa, laakiin waxa muhiim ah in laga fiirsado, sidii warbixinadu dadka ugu beeri lahaayeen dardar ay ku adeecaan waxqabadyadda ka hortagga leh ee la farayo. Qaybo dadwaynaha ka mida ayaa u nugul xaaladahan khatarta ah ee maanta jira. Waxaana dhici karta in ay adagtahay, sidii dadkaasi ku heli lahaayeen warbixino sax ah. Suurto galanna weeye in dad badan oo qaybahaas ka tirsani uga nugul yihiin dadka kale cudurkan Korona fayraska. Sababtuna waxa weeye, (tusaale ahaan goobaha ay ka shaqeeyaan ama qaab nololeedka guryahooda).

Ulajeeddada qoraalkani waa in la qiimeeyaa siyaabaha warbixinada lagu helo iyo adeeca waxqabadyadda ka hortagga leh iyo duruufaha shaqada ee dadka wadanka u soo guuray. Waxaan adeegsanaynaa baadhitaanka cudurka safmarka ee Hay’adda caafimaadka iyo nololwanaaggu samaysay ee ku saabsan, sida cudurkani u saameeyey nololwanaagga dadka ajaanabiga ee aan Finland ku dhalan (MigCOVID n=3 668, dhaqdhaqaaqa ka qayb-galka 60 %) macluumaadyadda (da’aha u dhexeeya 20–66). Illaa iyo inta laga helayo macluumaad la barbar dhigi karo kan, waxaan barbar dhigi doonaa macluumaad-baadhitaankii (FinTerveys 2017) ee laga qaaday dadwaynaha wadanka oo dhan. Waxaan barbar dhigaynaa baadhitaankan qaybaha da’aha dadwaynaha iyo dadka la baadhayaa isaga midka yihiin (n= 3490, dhaqdhaqaaqa ka qayb-galka 51 %).

Dadka wadanka u soo guuray intooda badan (94 %) iyo dhamaan dadwaynaha oo dhan (98 %) waxay ribood ka bixiyeen in ay heleen warbixin ku filan oo ku saabsan Korona fayraska iyo siyaabaha faafitaanka caabuqiisa looga hortago. Dadka wadanka u soo guuray ee Af-fiinishka ama Af-iswiidhiska sida fiican ugu hadlaa, waxay sheegeen in ay inta badan helayeen warbixin ku filan (97 %) marka loo eego kuwa aqoonta luuqadoodu tahay dhexdhexaadka (92 %) iyo kuwa ugu badnaan luuqaddu bilowga u tahay (91 %). Jawaab bixiyeyaashu waxay sheegeen in ay guud ahaanba si fiican ugu dhaqmeen waxqabadyadda ka hortagga faafidda cudurka oo tusaale ahaan guryahooda ayey joogeen, markay dareemeen astaamo hargab. (soo guuraagu 96 %, dadwaynaha oo dhan 97 %). Waxa sheegay in ay xoojiyeen nadaafadda gacmaha iyo illaalinta qufacooda (93 % labaduba tan waa isaga mid). Ka fogaanshaha dadka kale (Soo guuraagu waa 94 %, dadwaynaha oo dhanna 95 %). Ribood bixinta isticmaalka Af-shareerku wuu ka yara liitay kuwa kale (Soo guuraagu 82 %, dadwaynuhuna waa 84 %).

Waxyaabaha Soo guuraagu aan sida fiican ugu dhaqmin, waxa ka mida aaditaanka safaradda dibadaha (Soo guuraagu 84 %, dadwaynaha oo dhanna 97 %) marka la eego dadku siday app-ka (koronavillku) u oo dajisteen (Soo guuraagu 43 %, dadwaynaha oo dhanna 63 %) kuwan xitaa faraq wayn ayaa u dhexeeyey dadka soo guuraaga dhexdooda, marka degaan ahaan loo eego. Dumarku inta badan wixii la faray way ku dhaqmeen, marka dhanka ragga la eego. Dadka Finland u soo guuray (30 %) kaliya ayaa riboodka ku sheegay in ay guriga ku shaqayn karayeen, halka dadwaynaha oo dhanna (43 %) guryahooda ku shaqayn karayeen. Dumarka soo guuraaga afartii meeloodba meel ayaa ka shaqaynayey ama shaqobarad ugu joogay xarumaha daryeelka caafimaadka oo macmiisha si toosa ula kulmayey. Marka loo eego dumarkoo dhan, dumarka Afrikada ka soo guuray ayaa aad ugu badnaa xarumahaas oo waxay gaadhayeen boqolkiiba (60 %). Kala bar in ka badan (56 %) ayaa goobta shaqada ama shaqobaradka awood u lahayn in ay ka durkaan dadka, shaqada awgeed. Kuwa shaqada ama shaqobaradka ku jiray boqolkiiba 72 % ayaa nadaafadda gacmaha si fiican u illaalin karayey.

Way yara fiican tahay inuu jiro dareen ku saabsan ku dhaqanka waxqabadyadda ka hortagga leh iyo in dadku heleen warbixinno ku filan. Waxa soo shaacbaxay inuu xiriir ka dhexeeyo, sida dadku warbixin ku filan u helaan iyo darajadda luuqadoodda Finishka iyo ta Iswiidhiska, sidaa awgeed waa in lagu dhiiradaa in luuqado safeex ah oo fudud dadka wax loogu gudbiyo, marka la isticmaalayo qalabyadda fariin-gudbinta. Baahi gaara ayaa ka jirta in la helo macluumadyo iyo luuqado badan oo fariin gudbin ahaan loo isticmaalo siiba imika oo lagu jiro xaaladan safmarka Koronaha oo sidaa darteed ay tahay in mark kasta fariimaha dib u habayn ama dib u sixid loogu sameeyo. Waxa dhici karta in xoogaa majarahabaab ka jiro ribood-bixinta ku saabsan, siday dadku arrimaha la faray ugu dhaqmeen, marka la eego dhanka soo guuraaga iyo dadwaynahaba. Maadama oo aan la awaadin in gabigaba la dabar jaro khatarta ka iman karta goobaha shaqada, sababi kartana in cudurku faafo, waa in shaqo-bixiyuhu fiiro gaara u yeeshaa siduu dadka ugu suurtogelin lahaa xaalad shaqoo fiican, hagitaan iyo talo-siin fiican iyo in dadka kormeer la saaro oo la eego siday u adeecayaan wixii la faray, si loo yareeyo kala qaaditaanka korona fayraska ee goobaha shaqada.

**Ereyadda furaha:** korona fayras (Covid-19), Soo guuraa (ajanabi), waxqabadka ka hortagga qaadista cudurka